OREGON DEPARTMENT OF EDUCATION

Ogeysiiska 30-maalmood Imtixaanada Gobolka Guud ahaan 2018-19

DHAMMAAN ARDEYDU WAXAY QALINJABIYAAN

Sanadkii 2010, Oregon waxay meelmarisay kor u qaadista heerarka maadooyinka Ingiriiska iyo Xisaabta ee fasalada K-12, si loo xaqiijiyo in dhammaan ardaydu ay u kala gudbaan laga bilaabo fasal ilaa fasal heerkiisa aqooneed ee waxbarasho iyo xirfadaha laga maarmaanka u ah, sidii ay u guuleysan lahaayeen wixii ka dambeeya Dugsiga Sare. Waxa ay sababtu tahay in aynu kor u qaadnay qiyaasta aynu ardeyda ka rajeyneyno waxa ay garanayaan ama ay qaban karayaan; waxaa iyana sidoo kale aan isbedel ku sameynay, sida loo cabiro horumarka ardeyda marka la eego imtixaanada gobolkeena ee loo yaqaan "Smarter Balanced."

Waqti intee le'eg ayey imtixaanadu qaataan?

Imtixaanadu ma ah kuwo waqti loo qabto, sidaa awgeed ilmahaagu wuxuu qaadan karaan inta ay ama uu rabo inuu ku soo bandhigo wax uu ama ay garanayso ama qaban kareyso. Imtixaanadayada hadda, ilmahaaga waxaa la imtixaami doonaa sanad kasta hal mar, wuu kaga duwan yahay imtixaaadii hore ee arday fara badani qaateen dhowr jeer. Wax badan ka ogow waqtiga loo qiyaasay in ilmahaagu uu ku dhammeystiri karo imtixaanada bogga 36naad ee Buuga Maamulka Imtixaanka Oregon halkan: http://tinyurl.com/TestAdminManual.

Xaggee ayaan ka heli karaa natiijooyinka ilmaheyga, maxayna tahay macnaha ay sameyneyso natiijooyinku ?

Natiijooyinka imtixaanku waxay tilmaan ka bixiyaan meelaha uu ilmahaagu ku fiican yahay iyo meelaha uu horumarka ka sameeyey ee Luqada Ingiriiska iyo Xisaabta. Maado kasta waxaa loo kala qaybin doonaa qeybo ku tusi doona, sida fiican ee uu ilmahaa ugu qeybqaatay qeyb kasta. Imtixaanadu waxay cabiraan qiyaasta barashada ardeyga oo taxane ah. Gobolku wuxuu u habeeyey afar heer oo ay rabaan inay gaaraan iyada oo ay garab socoto qiyaastan guud ahaan sharaxaysa meesha ay ardeydu taagan yihiin. Iskuulka uu ilmahaagu wax ka barto ayaa kula socodsiin doona derejooyinka uu helay bilowga sanad-dugsiyeedka soo socda iyo sida ay u caawinayaan sidii uu ilmahaagu u guuleysan lahaa, inta ay ama uu fasalada iskaga gudbayaan.

Waa maxay macnaha uu sameynayaa in laga qeyb-qaato?

Maadaama imtixaan kali ahi aanu kaa siineyn sawirka guud ee horumarka ilmahaaga, inuu ilmahaagu qaato imtixaanada guud ee gobolku waxay macalimiinta iyo maamulku helayaan macluumaad ku saabsan in uu shaqeynayo habkani iyo meeshii u baahan in gargaar dheeraad ah laga siiyo. Waa muhiim in uu ilmahaaga ka qeybqaato imtixaanada si loo hubiyo iskuulada iyo dugsiyada degmada in ay helaan agabyadii ay higsanayeen ee ay ardeydu u baahneyd caawiyaan dhammaan ardeyda si ay u guuleystaan.

IMTIXAANADA GOBOLKA OREGON:

- **Tartan gali sidii uu ilmahaagu si qoto-dheer ugu fikiri lahaa** ka dib isticmaal fahamkiisa/keeda ee dhibaatooyinka dunida aan ku noolnahay
- **Weydii Ilmahaaga Run iyo been wax ka badan** si ay u sharxaan jawaabihiisa/eeda
- **Tallaabo horumarka ilmahaaga sawir ka bixin karta** iyada oo la tixgelinayo macluumaadyo kale oo wax ka sheegi kara guusha waxbarasho ee ilmahaaga
- **Wuxuu ka caawiyaa inay aqoonsadaan iskuulada iyo degmooyinka** u baahan gargaar dheeraad ah si ay hubiyaan in arday fara badan gaarayaan heerarka ugu sareeya

WAQTIYADA IMTIXAANADA GOBOLKA

Imtixaanada Xisaabta & Luqada Ingiriiska
Janaayo 1 – Juun 7, 2019

Qiimeynta La Dheereyey ee Luqada Ingiriiska & Xisaabta Oregon
Febraayo 14 – Abriil 25, 2019

Goorma ayuu ilmaheygu qaadan doonaa imtixaanka?

Ilmahaaga waxaa imtixaan laga qaadi doonaa marka uu ama ay dhammeystiraan ugu yaraan saddex-meelood labo-meelood sanad-dugsiyeedkooda. Iskuulka ilmahagaa ayaa go'aan ka gaari taariikhda uu ilmahaaga imtixaanada gobolka uu qaadan ee kor ku qoran.

XOGOGAAL NOQO

Haddii aad qabto wax su'aalo ama rabto inaad wax badan ka ogaato la hadal macalinka ilmahaaga ama maamulaha iskuulka.

Agabyo

Si aad u barato waxa ay tahay in ilmahaagu yaqaan ee uu qaban karayo Luqada Ingiriiska & Xisaabta halkan guji: http://tinyurl.com/ELARoadmap & http://tinyurl.com/MathRoadmap
Ka fiiri muunad su'aalaha imtixaanka ah halkan: http://tinyurl.com/ORPracticeTests
Ka akhri natiijooyinka imtixaanka ilmahaaga halkan: http://tinyurl.com/ORTestResults

OREGON DEPARTMENT OF EDUCATION

Foomka Doorashada In aanad Ka Qeybgalin 2018-19

SHARAXAADA XUQUUQDA

Xeerka Aqalka Wakiilada 2655 wuxuu waalidiinta iyo ardeyda qaangaarka ah u ogolaanayaa in aanay ka qeybgalin imtixaanada sanadlaha ah ee lagu qiimeeyo ardeyda Gobolka dhammaan maadooyinka Luqada Ingiriiska iyo Xisaabta, iyaga oo u soo gudbinaya foomkani iskuulka ay wax ka bartaan. Iskuulku wuxuu siin doonaa arday kasta oo laga dhaafay inuu ka qeybgalo imtixaanka gobolka waqti waxbarasho oo la kormeerayo inta ay ardeyda kale imtixaanka ku jiraan. Booqo halkan si aad wax uga barato Xeerka Aqalka Wakiilkada 2655: http://tinyurl.com/OR-HB2655.

Waa in waalidka/wakiilka ama arday qaangaarka buuxiyaa qeybtani Si Aanad Uga Qeybqaadan imitixaanada gobolka:

Magaca Awoowga Sharciga ee Ardeyga_____

Magaca Ardeyga Sharciga ah_____

Fasalka Ardeygu Ku Jiro_____

Magaca Iskuulka Ardeyga_____

Fadlan tilmaan imtixaanka(nada) gobolka ee aanad ka qeybqaadaneyn sanad-dugsiyeedka 2018-19 :

	Luqada Ingiriiska
	Xisaabta

Si aad u gargaarto qorsheynta dugsiyada degmada, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad foomkani aad u soo gudbiso **Iskuulka Ilmahaaga** bisha Janaayo 1deeda, 2019. Ardeyda isdiiwaangelisay ka dib waqtiyada imtixaanada gobolka ee bilaabmaya Janaayo 8deeda, 2019, waxaa la idinku dhiirigelinayaa in aad foomkani ku soo gudbisaa labo todobaad gudahood ee waqtiga isdiiwaangalinta. Foomkani wuxuu ansax yahay kaliya sanad-dugsiyeedka 2018-19. Waxaa waalidiinta iyo ardeyda qaangaarka looga baahan yahay in ay soo gudbiyaan sanad walba foomka looga dhaafayo inay ka qeybgalaan imtixaanada gobolka.

Waa fahamsanahay saxeexa aan foomkani saxeexayo waxaan dooranayaa in ilmaheyga laga dhaafo in imtixaanka laga qaado.

Waalid/Wakiil* _____Taariikh_____

(saxeex)

Waalid/Wakiil* _____

(ku qor magacaaga)

*Ardeyda qaangaarka ah(da'da 18 iyo ka weyn) waa ay isku saxeexi karaan iyagu waalidkooda ama wakiiladooda ugama baahna inay inay u saxeexaan.